



**DAWLADDA HOOSE EE DEGMADA GAROOWE
DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

WARGELIN DAD-WEYNE

Febraayo 13 2019

Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay ku hawlan tahay fulinta mashruuc ku saabsan horumarinta kaabayaasha iyo maamulka, gaar ahaan hirgelinta waddooyin laami ah kaas oo lagu magacaabo Mashruuca Did-u-soo kabashada Magaalooyinka Soomaaliya, ayna ka faa'iideysanayaan saddexda magaalo ee kala ah Garoowe, Hargeysa iyo Muqdisho uuna maalgelinayo Bangiga Aduunka. Ujeedooyinka mashruucan waxaa ka mid ah kobcinta dhaqan-dhaqaale iyada oo la beegsanayo horumarinta kaabayaasha iyo xoojinta maamulka dawladdaha hoose ee dalka. Mashruucani waxa uu daba socdaa oo uu ku xiran yahay mashruuc dhammaaday sanadkii hore bishii Luuliyo kuna saabsanaa in qiimeyn iyo falaanqeyn qoto dheer lagu sameeyo maalgashiga magaalooyinka Soomaaliya, gaar ahaan arinta ay mudnaanta siiyeen Maamulka Degmada Garoowe ee ahayd hirgelinta waddooyin cusub oo laami ah.

Dawladda Hoose ee Degmada Garoowe waxay go'aamisey in la hirgeliyo afar waddo oo laami ah, kuwaas oo fududeyn doona isku socodka iyo isku xirka dadka iyo gaadiidkaba, isla markaasna ka qeyb qaadan doona koboca dhaqaalaha bulshada iyo yareynta falalka amni darada keeni kara. Afarta waddooyin ayaa kala ah: b) Waddada *General* Nuur Salaad; t) Waddada Shiikh CabdiSalaam; j) Waddada dhanka waqooyi ka marta Hudheelka Sagal kana soo bilaamata Waddada Diktoor Jimcaale kuna dhamaata Waddada Shiikh Cabdulqaadir; iyo x) Waddada Jillab.

Sidaas awgeed, waxaa loo baahday in baaritaan iyo kormeer lagu sameeyo arimaha la xiriira deeggaanka iyo bulshada deggan agagaarka ama hareeraha waddooyinka la dhiso doono. Baaritaankii waxaa ka soo baxay in Mashruucu saameyn ku yeelanayo 14 qoys oo hareeraha ka xiga sadexda waddo ee kala ah: *General* NuurSalaad, Shiikh CabdiSalaam iyo Wadada dhinac marta Hudheel Sagal. Heerka saameynta bulsho iyo deeggaan ee mashruucu ma ahayn mid khatar weyn keeni karta maadaama waddooyinku ay aheeyeen kuwo horey u diyaarsanaa. Waxaa xusid mudan in meelaha qaar waddooyinka ay ka yaraadeen cabirkii loo baahnaa ee ahaa 10 meter oo ballac ah. Waxaa la go'aamiyey in meelaha wadadu cidhiidhiga ka tahay la ballaadihiyo oo la duminyo 1 ilaa 1.5 mitir iyada oo la raacayo Shuruucda Dawladda Puntland iyo kuwa Bangiga Aduunka kuwaas oo la xiriira sida loo maareynayo, loona dhawrayo hantida dadka saameyntu kaga timaado mashriicda horumarinta kaabayaasha. Intaas ka dib, waxaa kulamo joogto ah iyo wada hadalo lala yeeshay mulkiilayaasha guryaha la dumiyey, waxaana lagu heshiiyey nidaamka cawl-celin hantida iyo dib-u-dhiska guryaha ama deyrarka la duminayo.

Dawladda Hoose ee Garoowe oo isticmaalaysa Injineeradeeda waxaa qiimeyn lagu sameeyay qaabka duminta iyo dib u dhiska guryaha ama deyrarka wadada cidhiidhiga ku keenaya. Sidoo kale waxaa la qiimeeyay duruufaha nolosha dadka mashruucu saameynta ku yeeshay ee goobahooda/guryahooda la duminayo. Dawladda Hoose ee Garoowe waxay u cawl-celisay dhammaan dadkii laga dumiyey guryaha ama deyrarka si loo balaadhiyo wadada. Sidoo kale, waxaa taageero dhaqaale la siiyey dadka dan yarta ah gaar ahaan saddex qoys/qof oo kala deggan waddooyinka Gen. Nuur Salaad iyo Shiikh Cabdisalaam. Kharashka guud ee lagu fulinayo xalinta iyo cawl-celinta saameynta mashruuca waxa uu dhan yahay US\$26,831.90.

Ugu dambeyntii, Dawladda Hoose ee Garoowe waxaa mar walba ka go'an dhowrida iyo horumarinta arrimaha bulshada iyo deegaanka. Gaar ahaan, mashruucan waxa uu noo leeyahay muhiimad, waxaana dhowaan bilaaman doona hawlaha hirgelinta waddooyinka afarta ah ee kor ku xusan.

Mahadsanidiin,

Wada Shaqeyn Wacan,